

Somali | Soomaali

Iska-diiwaangelinta dugsiga hoose 2025

Bilaabidda dugsigu waa wakhti xiiso u leh carruurta, waaliidiinta iyo daryeelayaasha. Waxaan rabnaa inaan ku caawino si habka diiwaangelinta uu kuugu noqdo mid aad u sahlan.

Victoria gudaheeda, ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay in uu dhigto dugsiga loo qoondeeyey ee xaafada ('dugsigaaga xaafaddaada') sida uu qabo *Sharciga Dib-u-habaynta Waxbarashada iyo Tababarka 2006 (Education and Training Reform Act 2006)*.

Waxa kale oo aad boos ka codsan kartaa dugsi aan ahayn dugsiga degaankaaga. Dugsigu wuxuu tixgelin doonaa codsigaaga sida waafaqsan sharciga meelaynta. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Sharciga Meelaynta, booqo bogga [Diiwaangelinta dugsiga](#).



Jadwal cusub oo gobolka oo dhan ah isla markaasna ah Aasaaska (Prep)

Sannadka koowaad ee dugsiga hoose waxa loo yaqaan Foundation ama Prep. Waxaan sii deynay jadwalka diiwaangelinta Mu'asasada ee dhammaan dugsiyada hoose ee dawladda Victoria inay raacaan (eeg bogga 3aad). Jadwalku wuxuu higsanayaa inuu kaa caawiyo inaad fahanto goorta iyo sida aad ilmahaaga uga diiwaangelin lahayd Aasaaska sannad dugsiyeedka 2025.

Goorma ayay tahay in aan ilmahayga u diiwaangeliyo sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose?

Ilmahaagu waa inuu jiraa 5 jir ugu dambayn 30-ka Abriil sanadka uu bilaabay dugsiga.

Waxbarashadu waa ku qasab carruurta 6 sano jirsatay.

Si aad ilmahaaga uga diiwaan geliso dugsiga hoose ee dawladda Victoria sannad dugsiyeedka 2025, u soo gudbi codsiga diiwaangelinta dugsiga ugu dambeyn 26-ka Luulyo 2024.

Sidee uga diiwaan galin karaa ilmahayga sanadka ugu horeeya ee dugsiga hoose?

Tallaabooyinkan qaad si aad sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose u diiwaangeliso ilmahaaga:

1. Ka hel dugsiga deegaankaaga website ka Find my School (hoos eeg).
2. La xidhiidh dugsiga hoose ee dawladda si aad u ballansato kormeer dugsi ama si aad wax badan uga ogaato dugsiga iyo habka codsiga diiwaangelinta.
3. Ka soo deji xirmada macluumaadka diiwaangelinta Aasaaska (U diyaargarowga) ee [Diiwaangelinta Aasaaska \(U diyaargarowga\)](#). Xidhmada waxa la heli doonaa laga bilaabo Isniinta 15-ka Abriil 2024 waxana ku jiri doona foom codsi ah. Dugsigu waxa kale oo laga yaabaa inuu ku siiyo koobiga foomka si aad u buuxiso.
4. Soo gudbi arjiga isdiiwaangelinta ee Aasaaska **ugu dambayn Jimcaha 26-ka Luulyo 2024**.
5. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa natiijada codsigaaga **inta u dhaxaysa Isniinta 29-ka Luulyo iyo Jimcaha 9-ka Agoosto 2024**. Haddii aad hesho ogolaansho, waa inaad aqbashaa ogolaanshaha **ugu dambayn Jimcaha 23da Agoosto 2024**.
6. Ka qayb qaado macluumaadka isdiiwaangelinta iyo fadhigada kala gurka **inta lagu jiro Term 4aad ee 2024**.
7. Ilmahaagu waxa uu bilaabayaa Aasaaska **laga bilaabo Arbacada 29-ka Janaayo 2025**.

Sideen ku heli karaa dugsiga deegaankayga?

Ka hel dugsiga deegaankaaga bogga Find my School adoo raacaya tillaabooyinka hoose:

1. Geli findmyschool.vic.gov.au browser kaaga.
2. Geli address ka aad sida joogtada u degan tahay hoos 'Geli ciwaankaaga si aad u bilowdo'.
3. Dooro 2025 ee ku hoos qoran 'sanadka is-diiwaangelinta'. **Fiiro gaar ah:** 2025 aagagga dugsiga waxa la heli doonaa dabayaaqada Teermka 1aad, 2024.
4. Dooro Primary oo hoos timaada 'nooca dugsiga'

Khariidaddu waxay markaas tusi doontaa addresskaaga, dugsiga deegaankaaga, iyo dhanka bidix faahfaahinta xiriirka dugsiga. Haddii aad hoos u dhaadhacdo, waxay sidoo kale ku tusi doontaa shanta dugsi ee ugu dhow addresskaaga.

Waxaad sidoo kale ku raadin kartaa magaca dugsiga meesha ay ku qoran tahay 'Search for school'.

Ilmahaygu ma codsan karaa dugsi hoose oo dawladeed oo aan ahayn dugsiga deegaankaaga?

Haa, waxaad codsan kartaa dugsiyo aan ahayn dugsiga deegaankaaga. Dugsigu wuxuu u tixgelin doonaa codsigaaga si waafaqsan sharciga meelaynta iyo booska bannaan. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan sida codsiyada loo kala horraysiiyo bogga iska [Diiwaangelinta dugsiga](#).

Maxaa dhacaya haddii aan helo warqad ay ku qoran tahay in codsigayga diiwaangelinta lagu guulaysan waayay?

Waa inaad dalbataa inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso dugsi kale. Ilmahaaga waxa loo dammaanad qaaday in uu boos ka heli doono dugsigooda. Dugsiga deegaanka ee ubadkaaga waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo lagu salaynayo cinwaanka aad caadiyan ku nooshahay. Booqo [Soo hel Iskuulkayga](#) si aad ilmahaaga ugu heshid dugsiga deegaanka. Bogga [Diiwaangelinta dugsiga](#) ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad xaqiijiso address ka ilmahaaga si aad u diiwaangeliso.

Waxaad sidoo kale racfaan ka qaadan kartaa go'aanka. Bogga [Is-diiwaangelinta Aasaaska \(U diyaargarowga\)](#) ayaa leh macluumaad ku saabsan habka racfaanka looga qaadanayo natiijada codsiga diiwaangelinta.

Maxaa dhacaya haddii aan seego waqtiyada diiwaangelinta?

Waxaad codsan kartaa inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso Aasaaska sannad dugsiyeedka 2025 wakhti kasta laga bilaabo Term 2, 2024.

Marka lagaa codsado inaad soo gudbiso arjiga isdiiwaangelinta ugu dambayn Jimcaha 26 Luulyo 2024, codsiyada waa laga aqbali doonaa taariikhdaas wixii ka dambeeya qoysaska seegay wakhtigii diiwaangelinta, ka guura degenaanka ay sida rasmiga ah u degan yihiin ama dhawaan yimid Victoria.

Codsiyada diiwaangelinta ee la soo gudbiyo wixii ka dambeeya 26ka Luulyo 2024 waxa uu dugsigu u maareyn doonaa hadba sida loo helay, si waafaqsan Xeerka Meelaynta ee waaxda.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta dugsiga hoose?

Waxaad waydiisan kartaa dugsiga hoose ee deegaankaaga macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka diiwaangelinta Aasaaska.

Bilawga Teeramka 2aad, ee 2024 waxa kale oo aad ka heli kartaa xidhmo macluumaad ah oo ku saabsan habka diiwaangelinta Aasaaska bogga [Diiwaangelinta Aasaaska \(U diyaargarowga\)](#).

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fasiraada xidhmada macluumaadka, fadlan kala hadal dugsiga hoose ee deegaankaaga si aad u hesho caawimo.

Yaan kala xiriiri karaa wixii caawimaad ah?

Isu-duwaha Kala-guurka, Sarkaalka Diiwaangelinta ama maamulaha dugsiga hoose ee aad rabto inaad codsato ayaa kaa caawin kara su'aalo kasta oo aad ka qabtid habka diiwaangelinta.

Xiriirada (links) muhiimka ah

Fadlan hoos ka hel xiriiri (links) faa'iido leh oo adiga ku caawin kara marka ilmahaagu bilaabay dugsiga hoose 2025:

Soo hel Iskuulkayga (Find my School) – findmyschool.vic.gov.au

Macluumaadka aagagga dugsiga – vic.gov.au/school-zones

Isdiiwaangelinta Aasaaska (Prep) – vic.gov.au/enrolling-foundation-prep

Diiwaangelinta dugsiga – vic.gov.au/how-choose-school-and-enrol

Naafada iyo waxbarashada loo dhan yahay – vic.gov.au/disability-and-inclusive-education

Xiriirada xafiiska gobolka – vic.gov.au/office-locations-department-education

Jadwalka waqtiga 2024 ilaa 25

Taariikhaha 2024	Hawsha
Teeram ka 2aad: Isniin 15-ka Abriil 2024 ilaa Jimcaha 28-ka Juun 2024	
Teeramyada 1aad iyo 2aad, 2024	Dugsiyada hoose waxay qabtaan socdaalo tusmo ah, fadhiyo macluumaad iyo hawlo kale oo loogu talagalay qoysaska ilmahooda u doonaya diiwaangelinta Aasaaska (Prep) 2025.
Bilowga Teeram ka 2, 2024	Aagagga dugsiyada ee sannad dugsiyeedka 2025 waxay si toos ah uga socdaan findmyschool.vic.gov.au Waalidiinta iyo daryeelayaashu waa inay tagaan findmyschool.vic.gov.au si ay u helaan dugsiyada loo qorsheeyay xaafada (dugsiga deegaanka) 2025. Xirmada Macluumaadka Diiwaangelinta ee Waalidiinta iyo Daryeelayaasha ayaa diyaar u ah in laga soo dejiyo Diiwaangelinta Aasaaska (U diyaargarowga) .
Laga bilaabo asbuuca 1aad, Teeramka 2 2024	Dugsiyada hoose waxay u qaybin karaan Xirmooyinka Macluumaadka Diiwaangelinta qoysaska mustaqbalka iyo bulshada deegaanka.
Laga bilaabo asbuuca 1, Teeramka 2, 2024	Codsiyada diiwaangelinta ayaa furmaya – Waalidiinta iyo daryeelayaashu waxay soo gudbiyaan codsigooda diiwaan gelinta dugsiyada hoose ee dawladda wixii ka bilowdo taariikhdan.
Teeramka 3aad: Isniin 15-ka Luulyo 2024 ilaa Jimcaha 20-ka Sebtembar 2024	
Ilaa Jimcaha 26 Luulyo 2024	Codsiyada is-diiwaangelinta marka la soo gudbinayo – Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo gudbinayaan codsigooda diiwaan gelinta dugsiyada hoose ee dawladda taariikhdan.
Inta u dhaxaysa Isniinta 29-ka Luulyo iyo Jimcaha 9-ka Agoosto 2024	Dugsiyada hoose waxay ogeysiyaan waalidiinta iyo daryeelayaasha qoraal ahaan natiijooyinka diiwaangelinta Aasaaska (Prep), sida ku cad Sharciga Meelaynta ee waaxda. Tan waxa ku jiri kara warqad laguugu soo bandhigayo dalab, warqad xaqiijinaysa diiwaangelinta, ama warqad codsi ah oo aan guulaysan. Waalidiinta iyo daryeelayaasha soo diray warqad codsi ah oo aan lagu guulaysan waxay bilaabi karaan inay racfaan qoraal ah u gudbiyaan dugsiyada hoose.
Ilaa Jimcaha 23-ka Ogosto 2024	Waalidiinta iyo daryeelayaasha ayaa soo diray warqad dalab ah oo muujinaysa aqbalaadda booska ilmahooda taariikhdan.
Ilaa Jimcaha 23-ka Ogosto 2024	Taariikhda xiritaanka ee waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay u soo gudbiyaan dugsiyada hoose racfaan qoraal ah.
Ilaa Jimcaha 6da Sebtembar 2024	Dugsiyada hoose waxay ku ogeysiyaan dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaasha, qaab qoraal ah, natiijada rafcaankooda taariikhdan.
Ilaa Jimcaha 20-ka Sebtembar 2024	Taariikhda xiritaanka ee waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay ugu soo gudbiyaan rafcaan qoraal ah Agaasimaha Gobolka ee ay khusayso, halkaas oo ay ku guuldareysteen racfaankii ay u gudbiyeen dugsiyada hoose.
Teeramka 4aad: Isniin 7da Oktoobar 2024 - Jimcaha 20-ka Diseembar 2024	
Inta lagu jiro teeram 4aad, 2024	Dugsiyada hoose waxay qabtaan kalfadhiyo kala guurka ah.
Ilaa Jimcaha 1-da Nofeembar 2024	Gobolladu waxay qoraal ku ogeysiyaan dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaasha natiijada rafcaannada Agaasimaha Gobolka taariikhdan. Tani waxay khusaysaa kaliya rafcaannada la helo taariikhda xidhiitaanka ee Jimcaha 20-ka Sebtembar 2024.